

Xog la isu Sheegaa, Xasarad ka Waaweyn?

W.Q. Idiris M. Cali

June 5, 2010

Igama aha xag-xagasho. Igama aha sal-fudayd. Igamana aha baanise. Ee waa iga dadaal faagis aqooneed. Waana iga dadaal war-celis ku habboon hoggiisa.

I.

Muddo hal toddobaad iyo googgo' laga joogo ayaan qoraal kooban—oo ka digniin-werinaya kala *jiid-jiidashada aan dawna u bannaanayn* ee labada aragtiyood ee lagu baran karo “dhismaha” maansada Soomaaliyeed—u soo gudbiyey Wardheernews.com; waxa uuna qoraalku soo baxay 5/29/2010. Ujeeddada ugu culus ee qoraalkaas waxa aan u gartay “fal-celis” ammaba “sixid” qoraal kale oo muddo hore uu qoray Cabdiraxmaan Faarax (Barwaaqo). Haddaba, dulucda qoraalkaygaasi kuma aysan koobnayn “fal-celis” iyo “sixid” oo keliyah, balse diiraddu waxa ay saarrayd caddaynta “isku-mid-ahaanshaha” *furfurista* labada aragtiyood ee ay ina soo kala gaadhsiiyeen B.Sare. Carraale iyo Abwaan Gaarriye. Haddaba, sidii aan filayey, waxa qoraalkaygaas dulucdiisu caddayd ka soo fal-celiyey isla qorihii aan qoraalkiisa anigu ka dayrinayey: Barwaaqo.

Ugu horrayn, Barwaaqo waxa uu qoraalkiisan dambe ku falanqeyay aqoontayda afka; waxa uuna ku degdegay inuu khaladaad ka soo gurguro qoraalkaygii, si uu u minjo-xaabiyo garashada aan qoraalkaygaas ku dhisay. Si dhabtu tahay se, Barwaaqo wuu ku hungoobay inuu garashadayda afka Soomaaliga, gaar ahaan garashadayda maansada Soomaaliyeed, dheelliyo. Sababta oo ah, khaladaadkaas uu Barwaaqo dusha iiga shubay ma aha kuwo xitaa qoraalkayga laga dhadhansan karo; waxa dadku isweydiin karaa, Barwaaqo sababta uu qoraalkayga u dhuuxi waayey maxay tahay; ma degdeg baa? Haddaba, aan ku bilaabo, oon iska gilgilo, khaladaadka uu Barwaaqo igu sheegay:

Kow, waxa Barwaaqo ka hoos siibatay dhugashada waxa aan ku tilmaamay, runtii ay waliba dad ku xeel-dheer suugaanta ku tilmaameen, “Suugaanta erayga,” oo aan baadhis ku helay, iyo waliba sida aan ka soo dheegtay Abwaan Siciid Saalax Axmedⁱ, waxay u qaybsantaa: tix iyo tiraab. Barwaaqo oo dhiiqo ku dhex dhacayna waxa uu yiri:

Wax kalaba ha innoo danbeeyaane, suugaanta iyo ereyga iyamaa horta hor samaysma ama la hor bartaa? Waxan u malayn inuu qorahani yahay nin kayimid adduunyo kale! Waayo adduunka laguma hayo dad ku af dillaacsada curinta suugaanta ayaga oo aan baran hal iyo hawraar midna.ⁱⁱ

Haddaba, Barwaaqo ma waxaa iskaga dhex-laaqmay eray iyo suugaan-erayeed? Anigu qoraalkayga billowgiisa waxa aan ku xusay waxa afka shushuba inay yihiin affar habdhis, waxaana habdhisyadan kamid ahaa habdhiska erayga. Waxa aanan xusay in ay habdhisyadani yihiin xeerar u ah dhidibyo afka. Waxa kale oo aan xusay in ay xeerarkani xarakeeyaan waxa aan

ku magacaabay “aroorka afka” amma ay aqoonyahannada Soomaaliyeed (amma aqoonyahannada ajaaniibta ah ee ku hawlan afka Soomaaliga) u yaqaannaan “abla-ablaynta afka.” Aniga oo moosaya khalad ka iman kari lahaa (oo immika uu Barwaaqo is-mood-siiyey) kala garashada erayga iyo eray-suugaanta, waxa aan mar walba isku ladhay labada eray ee kala ah: eray iyo suugaan. Sida uu Barwaaqo moodayo, ee ah in aan anigu erayga dhalashadiisa ka horraysiiyey suugaanta curashadeeda, maaha khalad aan ku dhacay. Sababta oo ah, waxa aniga ii kala cad, oo ii kala soocan, erayga oo ah mid afka jiritaankiisa ka qayb ah, iyo suugaanta-erayga oo ah tiir kamid ah tiirarka ay suugaantu ka samaysantahay. Sida muuqata, jaantus aan ku soo ururiyey aroorka afka ayuu Barwaaqo ku arkay erayga oo hoos yimaadda suugaanta, sidaas ayuuna baddaas aa jirin u dabbaashay. Barwaaqo oo wali kuududa bartii uu ku barriiqday ayaa sii leh:

Waxa halkan ka muuqata inuu qoruhu, waa Idirise, ka soobaxay Jaamacad yaab leh oo isaga u gaarah. Waayo weli ma arag, isaga mooyee, cid tidhaa eraygu wuxuu qaybsamaa tix iyo tiraab. Intuu ka siidaray buunnaga dhaadhicinayaa in maansaduna tixda ka farcanto. Haddaba cid walba aqoon yahanlaguma sheege, ninkaasaan gacanta u taagay. Hadalkiina aan ku soo gaabsho:

Digtoorkii wacnaayow
Sawdigan cidlada degey!

Marka hore, anigu maan sheegan kaalin aqoonyahannimo! Ismana gaarsiin darajo aanan wada buuxin kerin. Sida dhabta ahna, kuma sheegan karo aqoonyahannimo aqoonta aanan salkeeda soo taaban; waana aqoonta Suugaanta iyo Dhaqan-hiddaheedka bulshada Soomaaliyeed. Balse, garashadayda lama gabbanayo, ma cabudhinayo, mana *buunbuuninayo*, ee waxa iiga baxa aqoontaas in aan dadka soo gaarsiiyo xil baa iga saaran; ciddii doonta ha qaadatee. Haddaba, haddii aan caddeeyay in aanan khalad ka gelin kala garashada waxa ay kala yihiin eray iyo eray-suugaan, waxa Barwaaqo u habboonayd ka fiirsi dheer, illeen aqoontayda iimma bal-balaadhsheene! Sidoo kale, waxa Barwaaqo u jidaysnayd hubsasho, illeen igumuusan carriirsheen weedhiisa uu ku yiri: “hadal baahadhay baa loo hadlaa ee uu arrinkiisu ahaa anaa hadhay oo hebel baan la dooday.”

Laba, Barwaaqo waxa uu sheegay in aan macnaha “alan” kharribay, oo aan hareer maray macnaha eraygaas sida uu B.Sare. Carraale u macneeyay. Sida jirtana, Barwaaqo iskumataxallujin dheehashada sida aan meelo kala duwan qoraalkayga uga waramay waxa uu yahay alanku. Marka koowaad, waxa aan alanka ku sheegay, oo uu Barwaaqona soo xigtay, in uu yahay “dhawaqa,” oo aan sii sheegay in uu alanku yahay dhawaq lahaan kara shaqal-gaaban amma shaqal-dheer, labaduna ay simanyihiin kolka la tirinayo. Si uu haddaba ii saxo, waxa uu Barwaaqo af-Ingiriis ku furfuray waxa uu alanku yahay, isaga oo cadeeyayna in alanku, sida uu B.Sare. Carraale u qeexay, ka koobanyahay shibane iyo shaqal. Haddaba, anigu ma seegi waayin garashada waxa uu alanku yahay, balse Barwaaqo ayey hoos-martay dheehashada tusaalahan aan ku sharraxay waxa uu alanku yahay:

Gal-la-da-ha-I-laa-hay-ka-ba-dan, gee-da-haas-ba-xa-e -- (16 alan; 4 shaqal-dheere)
Geed-joo-go-hoo-dii-had-daan, gud-u-ri-gow-loo-gay -- (13 alan; 7 shaqal-dheere)ⁱⁱⁱ

Haddii runta loo dareero, waxa cad in uusan alanku ahayn sida uu Barwaaqo yiri waxaa u qeexay B.Sare. Carraale oo kaliyah; sababta oo ah, meeriska tusaalaha kore, xarafka ugu dambeeya waa shaqal qudha, waxa uuna u taaganyahay alan; sida muuqatana xarafkani ma wato shibbane—sidaas awgeedna in alanka lagu macnaysto *dhawaaq cod ah*, oo waxa samayn karaa ay yihiin shaqallo, *khalad kuma jiro*. Haddii uu Barwaaqo moodayo in aanan anigu alanka u garanayn sida uu B.Sare. Carraale u qeexay (ogaalna^{iv} waa in uu B.Sare. Carraale alan ku tilmaamay shaqalka “e”), isla markaasna i bidayo “aqoon darro,” aniga oo tusaalahaas kore si cad ugu sharraxay waxa uu alanku yahay (sidaas si lamid ahna uu B.Sare. Carraale inagu tusay buuggiisa *Gorfaynta Gabayga*, bogga 21aad), waxa aan oran lahaa:

*Inuu hubsadey ahayde, Barwaaqo
Haddeerto ayaa ka hoolin?!*

II.

Qaybta dambe ee qoraalkiisan dambe, Barwaaqo waxa uu ku adkaystay in ay aragtida B.Sare. Carraale ee Miisaanka Maansada Soomaaliyeed fulin weyday affar qodob oo kamid ah siddeed qodob oo uu Barwaaqo u qoondeeyay ka jawaabista su’aasha ah: “Aragtida Carraale iyo ta Gaariye ee miisaanka maansada iyamaa mucweyn?” Ugu horrayn, waxa uu Barwaaqo iga filayey in aan “buriyo” oon ku diiddo jiritaanka qodobbadaas affarta ah, oo uu gebi calan-ku-saaray aragtida Abwaan Gaariye. Malahaygana, waxa uu Barwaaqo iga filayey in aan dhankayga ka soo tiirsho waxa ay affartaas qodob ka tiri aragtida B.Sare. Carraale. Balse sida aan anigu qoraalkayga “Kala Saaruha, Muu isa Saaro?” u dhigay, dulucdiisana ugu guntay, waxa aan simay labada aragtiyood; sidaas awgeedna, waxa aan ku dadaalay oon muujiyey in ay labada aragtiyoodba ay kaafinayaan dulucda ay qodobbada affarta ahi ka duulayaan, kadib markii aan muujiyey sida ay labada aragtiyoodi, ha kala gijjisnaadeene, ugu dheelmanayaan hannaanka Miisaanka Maansada Soomaaliyeed.

Haddaba, qodobaddaas affarta ah ayuu Barwaaqo dib inoogu soo bandhigay, kuna adkaystay in aysan aragtida B.Sare. Carraale kaafiyeyn intaba. Runtii duxi kuma jirto in aan qodobaddaas affarta ah jawaabihii (oo gebi ku daabacan rugaha-saabka ee Wardheernews.com) aan ka bixiyey sidooda ugu soo taxo qoraalkan, balse aan si duudduub ah jawaabo labaad u bixiyo. Waxa aanan filayaa inay jawaabahani kama-dambays u yihiin dood lagu ololo.

[*Xusuusin*: Meerisyada maanso kasta oo aan hoosta kaga faallooday, isla markaasna aan soo gudbiyey qaab-dhismeedkooda, waa meerisyo sal ah, kuwa farcanka ahna waa kuwaas salka ah oo hal alan (amma shaqal) la raaciyey, oo waliba dhan-sugan laga raaciyey.]

Qodobka 2aad: Agabka

Agabyada labada macallin saw kuma urursana xeerarka cilmiyeed ee ay kala adeegsadeen? Xeerarkani saw si cad uma qeexna? Ma jiraa wax farqi ah oo u dhaxeeya agabka labada macallin?

Haddii aynu caddayno in jawaabta su'aal kastaa tahay “haa,” waxa inoo ekaanaya in aan agab lagu sheegi karin macluumaadka uu Barwaaqo inoo sheegay inay agab u yihiin labada macallin. Qodobkanna sidaas ayuuba daaqadda uga baxayaa, oo waxaa liqaya qodobka afraad ee ah: xeerarka labada macallin soo saareen. Sababta oo ah, agabyada labada macallin waxa ay hoos imanayaan xeerarka ay kala adeegsadeen, oo agabyadu waa furayaasha xeerarka.

Waxa uu Barwaaqo sheegay in uu Abwaan Gaarriye adeegsaday shaqallada, halka uu B.Sare Carraalena adeegsaday alannada, agab ahaan. Sida jirtana, shaqalladu waxa ay aas-aas u yihiin aragtida abwaan gaarriye, halka ay shaqallada iyo alannada, *labaduba*^v, ay aas-aas u yihiin aragtida B.Sare. Carraale. Sida xaqiiqadu tahayna, shaqallada iyo alannadu waa ay kala gedisanyihiin. Haddii la kala reebo alanka iyo shaqalkana, lama helayo miisaan-maanseed jiritaan heer akaadami leh. Sidaas aawadeed, markii aan ku raacay B.Sare. Carraale in aragtidisu ka akaadamisantahay^{vi} ta' Abwaan Gaarriye, waxa aan sheegayey in ay aragtida B.Sare. Carraale isku fuuqfuuqsatay muhiimmada alanka iyo tan shaqalka marka loo dhaqaaqo dhismaha maansada. Waxa aan kolkaas sheegay, immikana caddayn doonaa, shaqalka iyo alankuba in ay mas'uul ka noqon karaan laaxin ku yimaada meeris kamid ah maanso sooc ah.^{vii} Tusaale ahaan, sida uu B.Sare. Carraaleba inoogu tusay buuggiisa *Gorfaynta Gabayga*:

Laaxin Alanku Keenay:

Ninka dheregsan **maalintaa** inay, taladu dhaafayso

Oo ku saxsan sidan:

Ninka dheregsan **maantaa** inay, taladu dhaafayso

Laaxin Shaqalku Keenay:

Ha furfurin dermada **la iga** waa, **inaan** fariistaaye

Oo ku saxsan sidan:

Ha furfurin dermada **layga** waa, **inan** fariistaaye

Laaxin-saarakaas kore habka loo marayo waxa si xeel-dheer inoo tusay B.Sare. Carraale; waana agab faa'iido badan leh (eeg *Gorfaynta Gabayga*: bogga 23 – 24). Agabkanna waxa uu ku dheelmanayaa xeerka uu dejiyey B.Sare. Carraale oo ah in ay shaqallada dhaadheer meelo sugan ka geli karaan meeriska, isla markaasna la isku dheelli-tiro tirada alanka iyo tan shaqal-dheeraha ee meeriska. Haddaba, farqiga u dhaxeeya labada agab ayaa ah in uu B.Sare. Carraale soo kordhiyey muhiimmada alanka, halka uu Abwaan Gaarriye gaari kari waayey falanqaynta waxa ay alannadu yihiin iyo muhiimmadoodaba. Halkaasna waxaa inooga cad in uu B.Sare. Carraale isna calan dahab ihi uga babbanayo gaadhista dulucda qodobka labaad ee uu Barwaaqo soo bandhigay.

Dhanka kele, waxa aan filayaa in uu Barwaaqo qaadan doono in aysan aragtida Abwaan Gaarriye kaafiyi karin qodobkan 2aad haddii sida uu Abwaan Gaarriye xeerkiisa u soo tebiyey la eego; illeen shaqalka oo qudha laaxin ma sababee. Waxa kale oo aan filayaa in ay Barwaaqo ku duxayso muhiimada loo isticmaalo alanka, oo uu B.Sare. Carraale si dheer u *qexay* si laaxinka laysaga dhawro, oo meeris cuddoon loo dhiso.

Qodobka 5aad: Xiriirka Maansooyinka ka Dhaxeeya

Waxa layaab leh, in uu Barwaaqo inaga dhaadhiciyo in xiriirka ka dhaxeeya maansooyinka si hufan loogu fahmi karo adeegsashada aragtida Abwaan Gaarriye, isaga oo uu Barwaaqo xusay in uu Abwaan Gaarriye yiri: “Mar kasta oo aad shaqal soo kordhiso ama dhinto waxaad ku turunturoonaysaa maanso cusub, maxaa qurux ku jirta afkeenna.”^{viii} Haddaba, isweydiintu waa: Jiifto saggaalley iyo heesta-haanta xiriirka ka dhaxeeya ma shaqal uun baa, mase alankuna qayb buu ka yahay xiriirka ka dhaxeeya labadan maanso? Miyeyse ahayn aragtida B.Sare. Carraale ta’ alanka isticmaalkiisa jidaysa? Tusaale:

- Alla bari dadweynuhu
Haantii qaboy qoor **yar** -- hal alan baa soo biiray
- Haddii col la sheego
Haddaan casarkii **carraabo** -- laba alan baa soo biiray

Tusaale kale aannu ku eegno sida ay aragtida B.Sare. Carraale u muujinayso xiriir ka dhex suubsami kara maansooyinka (wadarta tirooyinka bidixda xiga ee ku jira qawska waa alannada, tirooyinka midigta xigana waa shaqallada dhaadheer):

$\begin{array}{c} \uparrow \\ \\ \downarrow \end{array}$	<p>(5+0,1) Dabangaallaha</p> <p>(5+1,1) Dawadeedi tahay -- alan baa soo biiray: “hay”</p> <p>(5+2,1) Calankaas babbanina -- laba alan baa soo biiray: “ni” iyo “na”</p> <p>(5+3,1) Amma loo dildila rogay -- saddex alan baa soo biiray: “la,” “rog,” iyo “oy”</p> <p style="text-align: center;">⋮</p>
--	--

Waxaan tusaalahaas kore ka dareemaynaa in ay alannada meerisyadaas kore ka simanyihiin 5, balse uu meerisba meeriska uu ka hooseeyo yeelanayo alano biir ah, sida: 1, 2, 3. Sidoo kale, waxa aan tusaalahaas kore ka dareemaynaynaa in ay aragtida B.Sare. Carraale qaabaynayso meerisyada xiriirka ka dhaxayn kara. U fiirsada, dhammaan meerisyadaas kore waa farraarro isku wada mid ah; meeris walba waxa uu wataa hal shaqal-dheere. Haddaba, aan sii badino tusaalaaas kore, annaga oo soo taxayna saddexda farraar ee ugu horeeya (amma ugu dambeeya; waxayna ku xirantahay adeegsashada shaqallada kala jaban, amma ku wada aan kala jabnayn^{ix}) meerisyada maansooyinkan:

B. Shaqal-dheere lagama helayo meeriska:

- (4+0,0) Calaliye -- [heesta mooyyaha]
(4+1,0) Ya'da sarsarka -- [heesta shimbiraha]
⋮
(4+5,0) Garta madal ka naqi kara -- [jiifto]
⋮

T. Hal shaqal-dheere ayaa laga helayaa meeriska (waxa kolkaas laga bilaabayaa heesta shimbiraha, sababta oo ah heesta mooyyuhu ugu badnaan saddex alan ayey ku dhisantaa marka laba alan ay yihiin shaqallo gaaggaaban, halka alanka saddexaadna uu yahay shaqal dheer):

- (4+0,1) Hal ahaade
(4+1,1) Hal nimadiisa -- [heesta damabgaallaha]
(4+2,1) Dayro haka dhigin -- [heesta xoolaha]
(4+3,1) Dalkanagu wacanaa -- [heello-gaab]
⋮

J. Laba shaqal-dheerayaal ayaa laga helayaa meeriska:

- (3+0,2) Geelii dhal
(3+1,2) Ma cunaayee
(3+2,2) Ee ila dadaal
(3+3,2) Dhaliil ugubeedka
⋮
(3+15,2) Bari dahab waxa ku jira ma rabo, Baashe baa yiriye -- [gabay]

X. Saddex shaqal-dheerayaal ayaa laga helayaa meeriska (waxa kolkaas laga bilaabayaa heesta damangaallada, illeen heesta shimbiruhu ma laha saddex shaqal oo dhaadheer e):

- (3+0,3) Maaxdii Tuur
(3+1,3) Laab dooxantood
(3+2,3) Ciiddii hanuunsan
(3+3,3) Dhiilloodka dhegtaagga
(3+4,3) Yaan soo bax lay orane -- [heesta haanta]
(3+5,3) Ka soo baxa iilka qaadka
(3+6,3) Gashaantiyo roorayaa iman -- [dhaanto]
⋮
(3+14,3) Ha ku guban dheh waa guluc shishiyo, goobadaan xiraye

...

Haddaba sidaas ayey aragtida B.Sare. Carraale inoo tusaysaa xiriirka ka dhaxeeya bahaha maansooyinka. Sida jirtana, maanso waliba way goosmaysaa marka ay waydo tirada shaqallada dhaadheer iyo waliba *tirada alannada* ee ay kala mid ahaan lahayd maansooyinka kale, sida ay maansada (heesta) shimbiruhu u goosantay.

Dhab ahaantii, xiriirka ugu weyn ee maansooyinka ka dhaxeeya waxa la dhuuxi karaa kolka maansooyinka laftooda la'isku dhereriyo, oo maanso walba la eego jaangooyadeeda. Waxaana hubaal ah in ay aragtida B.Sare. Carraale si nidaam ku jiro u muujinayso xiriirka ka dhaxayn kara maansooyinka isku jaangooyada ah. Tusaale ahaan, maansooyinka soo socda waxa la oran karaa xiriir weyn ayaa ka dhaxeeya, dhis ahaan, oo hogagga shaqal dheerayaasha meeris walba ku jira waa isku wada mid:

- (2+0,2) **Mooyaan**
- (2+1,2) **Guuguugu**
- (2+2,2) **Dooryaan** dhala
- (2+3,2) **Oo dhiig** qulqulay
- (2+4,2) **Waatay** tiri quf
- (2+5,2) **Daadduunka** weheshaday
- ⋮

Amma

- (5+0,4) **Haaneedka** siisee
- (5+1,4) **Waa beelo** ceebeede

Si kastaba ha ahaatee, miyeynan aragtida B.Sare. Carraale, oo adeegsigeeda alanka oo qudha lagu simay, ina tusayn xiriirka ka dhex jira maansooyinka, oo aysan waliba aragtidani farraarba farraarkiisa u soocahayn? Jawaabtu waa “haa.”

Dhanka kale, labada meeris ee uu Barwaaqo yiri xiriir baa ka dhaxeeya ee kala ah: 1) *Haddaan casarkii carraabo*, iyo 2) *Saaxirkii kala guuraye*, sida inoo cad, marka hore, aragtida B.Sare. Carraale waxa ay labada meerisba siisaa magaca ah: siddeed-saddexle; marka xigana, aragtida B.Sare. Carraale waxa ay ina tustay in xiriirka ka dhaxeeya labadan meeris uu yahay mid daciif ah, sababtuna tahay in ay labadan meeris wataan shaqallo dhaadheer oo aan hogag isku mid ah ku taxnayn; inkasta oo ay isaga mid yihiin, dhisme ahaan, ubucda ah: *daan casarkii car -- kii kala guurra*. Ugu dambaynna, waxa inoo cad in qodobkan 5aadna ay aragtida B.Sare. Carraale fulisay; una fulisay si xeel-dheer.

Qodobka 7aad: Xisaabta

Barwaaqo waxa uu inoo sheegay in ay aragtida Abwaan Gaarriye qiimo weyn siiso adeegsiga xiisaab amma qaaciidooyin, si loo ogaado xiriirka ka dhaxeeya maansooyinka.

Waxa uu tusaale ahaan u soo qaatay: jiifto = x iyo heesta-haanta = y, debadeed:

$$\text{Jiifto} = \text{heesta-haanta} - 1 ; x = y - 1$$

$$\text{Heesta-haanta} = \text{jiifto} + 1 ; y = x + 1$$

Waxa uu barwaaqo yiri: “Gaariye wuxu si toosa innoogu sheegay in miisaanka maansadu ku fadhiyo xisaab iyo qaaciidooyin ee aanay ahayn wax jaantaa rogan ah.” Haddaba isweydiintu waa: xisaabta laga hadlayaayi halkee bay sal ku leedahay? Sida *inooga muuqata hindisaha Abwaan Gaariye, xisaabtani* saw kuma fadhido adeegsiga shaqallada; oo farqiga u dhaxeeya jiifto iyo heesta-haanta saw hal shaqal uun maaha? Sidii aannu soo aragnay, alanku, sida shaqalka, waxa uu noqon karaa xadka ka dhexeeya maansooyinka; halkaasna waxa aynu ka galaynaa aragtida B.Sare. Carraale, oo qodobkanna labada aragtiyood ee labada macallin waa ay ka sinmayaan.

Balse, qiimo sidaa u buuran ma siin karnaa muhiimmada ay xisaabtu amma isleegyadu ku leeyihiin miisaamista maansada? Isleegta: $y = x + 1$, miyey wax ka sheegi kartaa god-maansaha amma heerka farraarka? Isleegta: $y = x + 1$, miyey ina tusi kartaa in meerisku cudoonyahay iyo in uu laaxin ku jiro? Isleegta: $y = x + 1$, miyey ina garan siin kartaa maansada laga hadlayo magaceeda? Haddaba, jawaabta su’aalahaasi waa “maya.” Tusaalayaasha uu Barwaaqo is yiri ku gijji qodobkan xitaa ma caddayn karaan faa’iidada isticmaalka isleegta $y = x + 1$, amma base ujeeddada ay isleegtu ku qotonto—waxa aan ka ahayn muujinta xiriirka ka dhexeeya maansooyinka qaar. Waxa uuna Barwaaqo dib inoo tiimbiyey, oo uu far kale inoogu dhigay, xiriirka ka dhexeeya maansooyinka marka uu leeyahay: heesta-maqasha (H_{maqasha}) $- 3 =$ heesta-hadhuudhka ($H_{\text{hadhuudhka}}$)! Haddaba, qodobkan waa in uu gadaal ka raaca qodobka 5aad, maaddaama uusan iskii isu taagi karin, xiriirka maansooyinkana uu ka waramayo. Haddii la rabo in qodobkan halkiisa lagu kaabo, waa in isleegyo hufan oo tilmaan waafi ah ka bixinaya Miisaanka Maansada Soomaaliyeed la habeeyaa!

Dabcan xisaabta uu Abwaan Gaariye sheegayo inay astayso MMS waa xisaabta qarsoon ee uu B.Sare. Carraale ina tusay inay tahay xisaabta isu dheelli-tiraysa tirada shaqalka iyo tan alanka ee meeriska. Sida aan qoraalkaygii hore ku xusay, ee ahayd in MMS uu yahay xeer u dhigma xeerarka dabiiciga ah, wali run ma aha, balse waxa ay rumoobaysaa marka aynu xeerka MMS ku cabbirno qaabaan^x (formula) sugan—oo laga soo dhex saarayo fahanka MMS. Sida qaabaankan:

$$F = ma$$

Qodobka 8aad: Kala Garashada Badaha Maansooyinka

Aniga oo qeexaya waxa ay maansadu tahay, oo aan waliba qeexistan badideed ku saleeyay aragtida B.Sare. Carraale, waxa aan dhigay:

Maansadu marwalba waa hoor leh farshaxan u shubma meeris meeris [meeriskuna uma samaysna sida weedh oo kale]. Meeris kasta oo maanso ahna waxa uu yeeshaa xaraf-raac (qaafiyad) iyo dheellitir ka dhex taagma wadarta shaqal-dheere iyo tan dhawaqa (alan) ee isla meeriska. Kolka

dhawr meeris oo isku duluc iyo isku xaraf-raac ah ay is raacaan, is hoos taxmaan, dhammaantoodna ka simanyihiin tiro go'an oo shaqallo ah, islamarkaasna ay meerisyadani kulmiso jaan-goyn soocan, waxa dhasha tuduc ah xidhmo maanso ah. Haddii ay dhawr tudcoodi saas isku raacaanna, waxa dhasha maanso ku dhisan hal xaraf-qaad (maansooyinka haweenka siiba Buraanburka waxa laga helaa dhawr xaraf-qaad oo kala duwan). Ugu dambaynna, maansadaas curantay waa in ay ujeedo mug-weyn ku qotontaa, si' wakhti-dhuubanna uga warantaa mawduuc hadalku duxda ka qaadi lahaa (amma waa in ay murti rib ah yeelataa).

Haddaba, waxaa jira dhawriyo-toban waji oo ay maansadu u kala bax-baxdo. Ka soo qaad in ay maansadu tahay geed kamid ah geedaha tixda ee goofka eray-suugaanta, kolkaas waji kasta oo maansada kamid ahna waxa uu noqonayaa laan ku dheggaan geedka maansada. Laamaha (amma wajiyada amma badaha amma bahaha) maansada ee illaa haddeer la magcaabi karo waxaa kamid ah: Gabayga/Guurowga, Buraanburka (oo dhawr laamood ah), Masafada, Dhaantada/Heellada/Wiglada/Hirwada, Geeraarka (oo isna dhawr laamood ah), Heesta-dhallaanka/Saarka/Heesta-haanta/Baarcaddaha, Jiiftada/Batarka, Heello-gaab/Heesta-maroodiga, Heesta-xoolaha, Heesta-dabangaallaha, Heesta-shimbiiraha, iyo Heesta-mooyyaha.

Maansada haddii xubnaheeda asla dhab ahaan la baandheeyo, waxa la cuskan karaa laba qodob oo kala ah: 1) dhismaha (dawliilka) meeriska maansada iyo 2) dabuubta maansada....Runtii aad ayuu qodobka labaadi u culusyahay, waana "socda" maansada, haddii uu qodobka koobaadi noqon karo "saanta" maansada. [Qodobka "dabuubta" ee maansada waxaa lagu gorfeeyaa aqoon walba oo maanso ku saabsan marka laga reebo "aqoonta dhismaha maansada."]

Marka aynu leennahay qodobka koowaad waa saanta maansada, macnuhu waxa uu daaranyahay in qodobka koowaad lagu cabbiri karo xeer abbaar toosan leh. Xeerkan, oo uu muran ka taaganyahay cidda hor-magacawday, amma seestay jiritaankiisa, ayaa ah xeerka Miisaanka Maansada Soomaaliyeed. Xeerka Miisaanka Maansada Soomaaliyeed (MMS)—oo asal ahaan maansoyahan kasta laabtiisa xag-Alluun ugu daabacan, balse badhtanaadkii 1970neeyadii si daalac leh ugu soo if-baxay qoraallada iyo daraasadaha B.Sare. Cabdillaahi Diiriye Guuleed "Carraale" iyo Abwaan Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye," sidoo kalena waxa MMS sii bal-balaadhiyey Culimada Hiddaha iyo Dhaqanka ee Jabuuti oo uu hor-kacayo Maxamed C/laahi Riiraash—waxa uu xarako u yahay, oo uu kala nidaamiyaa, maansooyinka ku aroora eray-suugaanta hawraartanka afka Soomaaliga.^{xi}

Haddaba, marka la sii dhex galo xeerka MMS, waxaa la garwaaqsan karaa xiriirka ka dhexeeya bahaha maansooyinka, si loo garto kala gedisnaanta ammaba isku-mid-ahaanshaha maansooyinka. Qoraalkaygii hore waxaan ku taabtaabtay sida ay labada aragtiyood ee B.Sare. Carraale iyo Abwaan Gaarriye si is-le'eg uga qayb-qaataan kala garashada maansooyinka. Sida qeexistaa maansada ee kore ka muuqatana, maanso kastaa waxa ay maanso kale kaga duwantahay waa: 1) tirada shaqallada (oo aynu odhan karno imika *tirada alannada oo gaaggaab laga yeelo kuwa dhaadheer, kuwa gaaggaabanna sidooda looga tago*, sida: ha-ad, we-er, hal, bad, tan, fal, i.w.m.) ee ay badida meerisyada maansadaas soocani wataan, iyo 2) habka ay shaqal-dheerayaashu u degayaan meerisyo badan oo maansadaas soocan kamid ah. Sidoo kale, waa in aan agoonnaa in dhawr maanso oo kala magac ihi ay yeelan-karaan xeer-miisaameed isku wada mid ah; sidii aan qoraalkaygii hore ku muujiyey oo ah in maansooyinka kala magaca ah ee

dhaanto, hirwo, wiglo iyo heello ay isku mid yihiin, dhisme ahaan (laakiin “dabuub” ahaan *laga yaabaa* in ay ku kala gedisanyihiin). Maansooyinkan soo socda, miisaan ahaan, waa isku mid, balse laga yaabaa in dabuubta ay maanso waliba ku dhisantahay kaga gedisantahay maansada kale:

Batar^{xii}: Miisaan → W W V W W [9 shaqal]

(6,3) Saddex waa gudaysaa

(8,1) Gesi geeli lala tegay* -- ku khaldan sidan: Geesi geeli lala tegay

(8,1) Gadh-madoobe ficil galay

(6,3) Arku waa gudaayaa* -- ku khaldan sidan: Aarku waa gudaayaa

Jiifto: Miisaan → W W V W W [9 shaqal]

(8,1) Marka hore dad baan ahay

(8,1) Dunji dhalan-rogtaan ahay

(7,2) Nebi doorrn baan ahay

[* B.Sare. Carraale waxa uu sheegay in uu maansoyahanku carrabka ku xadi karo gaabinta amma dheerraynta shaqallada, si uu maansoyahanku u toosiyo meerisyadaas iyaga ah. B.Sare. Carraale waxa uu debadeed garashada maansoyahanka inagu garwaaqsiyey eray-bixinta “faal-tuug,” oo isticmaalkiisu imika inoo saxay “qorista” labaas meeris ee kore. Waxa ayna tani daliil jira u tahay, oo ay ina xusuusinaysaa, jiritaanka miisaanka maansada ee oraah ahaantiisa maansoyahan kastaa dhaxalsanyahay.]

Dhanka kale, maansooyinka ka sinnaan kara tiro shaqallo ah oo go’an, balse aan ka sinnayn hab-miisaameedka meerisyadooda, isla markaasna la odhan karo waa maansooyin kala jaad ah, waxa kamid ah: heesta haanta iyo baarcaddaha. Tusaale:

Heesta Haanta: Miisaan → W W V W W V [10 shaqal]

(6,4) Naa baayo beesheenu

(6,4) Waa beelo ceebeede

(8,2) Yaan bahaladlay filine

(7,3) Yaan soo bax lay orane

(8,2) Adna lagu billaaweyne

(6,4) Baayoy bulloy ii bax

(7,3) Furfuroo fur weyn ii bax

(7,3) Xeeriyo fandhaal buuxi

Baarcadde, “Maqaloo Oy”: Cali Mire Cawaale: Miisaan → V W W W V [10 shaqal]

(7,3) Dhulkiinaan kala dayrto

(7,3) Idiin diido xaqiinna

(7,3) Dantiin yaan cidi eegin

(8,2) Misana iigu dulqaata

(7,3) Wallee daw nagu maaha

Waxa aan qoraalkaygii hore ku xusay in ay aragtida B.Sare. Carraale si dhammays tiran inoo barayso xeerar naga caawiya kala garashada badaha maansooyinka. Labada xeer ee uu B.Sare. Carraale hindisay, siiba xeerka labaad ee muujiya hogagga shaqal-dheerayaasha ee meeriska, waxa aan muujiyey inaysan khaldanayn, billowna ahayn. Haddaba, aniga oo adeegsanaya isla xeerarkaa uu B.Sare. Carraale ina soo hordhigay, aan ka jawaabo su'aalahan uu Barwaaqo ina weydiiyey:

Qodobka 8aad ee hal-beegyada u dambeeya waxan ku tilmaamay inaanay badaha wiglo, hirwo, dhaanto ama baarcadde iyo heesta caanaha, ama jiipto iyo heesta cawsku isku qaab dhismeed ahayn. Hayeeshee, qoruhu wuxu ku adkaysanayaa inay dhammaantood isku mid yihiin. Wax taageero ahna muu sheegin. Waxa, haddaba, iga weydiin ah dadka Soomaaliyeed maxay waxaas oo maanso ah oo isku wada mid ah ugu kala bixiyeen magacyadaasi kala wada duwan?

Ugu horrayn, anigu ma aan oran dhammaan maansooyinkaas uu Barwaaqo xusayo waa isku wada mid; balse waxa aan iri maansooyinka dhaanto, heello, wiglo iyo hirwo waa isku wada mid, oo waxa aan xitaa caddeeyay in ay qaab-dhismeed qudha wadaagaan. Sida dusha ku cadna, waxa aan caddeeyay in ay maansooyinka (heesta) haanta (caanaha) iyo baarcadduhu kala duwanyihiin, dhisme ahaan. Labada maanso ee hadhsanna, sida uu B.Sare. Carraale u muujiyey, ee in ay labada maansood, waa jiiptada iyo heesta cawska e, ay isku xidid yihiin, isla markaasna alanka ay heesta cawsku dheertahay tan jiiptada in ay keento luuqda, ayaa sal ah. Tusaale:

VV V VV W W :: Cawskanow sabool diid -- [jiipto]
VV V VV W W (W) :: Cawskanow sabool diid (ow) -- [heesta cawska]

Haddaba, waxa aan filayaa in ay Barwaaqo u caddaatay waxa laga wado “qaab-dhismeed,” oo ay labadaas meeris iska shabbahaan. Waxa Barwaaqo looga fadhiyaa in uu caddeeyo waxa kala duway amma sida ay ku kala duwanyihiin qaab-dhismeedka maansooyinka dhaanto, heello, wiglo, iyo hirwo; sidoo kalena, waa in uu caddeeyaa waxa kala duway qaab-dhismeedka maansada jiiptada ah iyo tan heesta cawska ah, isaga oo isticmaalaya meerisyada uu B.Sare. Carraale isticmaalay kuwo aan ka dhicin, si bal uu u xoojiyo waxa uu hadiyo goor leeyahay waa kala qaab-dhismeed! Kedib haddii uu sidaas ku saxsanyahay, geeraarka dhawrka laamood leh, waxa uu Barwaaqo ina farayaa in uu dhawr maanso oo kala duwan yahay. Tusaale:

Geeraar waa igu ceeg
 2 2 2 1 1 2
 Geeraar waa igu ceegoo
 2 2 2 1 1 2 2
 Way caanaha geela
 2 2 1 1 2 1
 Way caanaha geeloo
 2 2 1 1 2 2

Haddaba, maxaa geeraarka dhawr magac loogu kala bixin waayey, haddii uu Barwaaqo moodayo in magaca maansada loo bixinayo uu miisaanka maansada wax ka ifinayo? Ugu dambayna, waxa inoo cad in ay aragtida B.Sare. Carraale si dhammays tiran u muujinayso kala garashada maansooyinka bulshooyinta Soomaaliyeed.

III.

Haddii aan qoraalkan soo af-meero, anigu kuma af-lagaaddoon ummada Soomaaliyeed, waxay sharaystaanna uma sheegin, waxay ku qanci waayaanna uma soo bandhigin—iyagaanna awood u leh inay igu raacaan iyo inay igu raaci waayaan aragtiyada aan ka qabo affarta qodob ee uu Barwaaqo keli-ahaan aragtida Abwaan Gaarriye kaga sarreysiiyey aragtida B.Sare. Carraale, oo uusan marnaba xamilli waayey garwaaqsashada awoodda aragtida B.Sare. Carraale. Xaqiiqadu waa in siddeeda qodob ee uu Barwaaqo ina soo hordhigay ay labada aragtiyoodba ka simanyihiin. Haddaba maxaa keenaya in uu Barwaaqo u arko in ay aragtida Abwan Gaarriye ay fulinayso affarta qodob ee aan qoraalkan kaga hadlay, iyada oo uu nagu dirqinayo, si dadban iyo si daalac lehba, in aysan aragtida B.Sare. Carraale fulinahayn affartan qodob?

Ta koobaad, waa in uusan Barwaaqo si dheer u dhuuxin aragtida B.Sare. Carraale. Sababta oo ah, ma uusan qoreen, “Waxa, haddaba, halkaasi innooga dhuroobay in laaxinka tuducaasi galay ahaa shaqal ee aanu ahayn alan. Waana taasi ta keentay inaan idhaa Carraale ma kala qeexin waxa laaxinka samaynaya,” iyada oo uu B.Sare. Carraale si fiiro dheer leh u muujiyey waxa laaxinka meeriska sameenaya, kuna muujiyey buuggiisa uu qoray 1976, ee ah *Gorfaaynta Gabayga*, baashka: 23 – 24.

Ta kale, waa in uusan Barwaaqo dhuganin aragtida B.Sare. Carraale, sababta oo ah ma uusan qoreen, “Qodobka kale ee ay fulinwayday aragtida Carraale wuxu ahaa ka 5aad...,” iyada oo uu B.Sare. Carraale inoo sharraxay in xiriirka ka dhaxeeya bahaha maansada aysan ku keli ahayn shaqallada, balse ay jirto xiriir marar badan lagu arko maansooyinka oo uu alanku mas’uul kayahay; isla xiriirkanna inuu u qaybsamo mid diciif ah iyo mid aan diciif ahayn ayey na bartay aragtida B.Sare. Carraale.

Tan kalena, waa in uu Barwaaqo ku khasaaray xisaabta uu yiri waxaa lagu muujin karaa muunnada (miisaanka) maansada; runtii aan aniguna qabo inay xisaabtani billow tahay, oo aysan wada lahayn heerar lagu saafan karo waxa uu miisaanka maansadu yahay. Haddii uu haddaba Barwaaqo iga filayey in aan buriyo qodobaddiisaas qaar kamid ah, waxa aan haddaba buriyey qodobkan oo runtii aan faa’iido inoogu fadhiyin.

Ta ugu dambaysana, waa in uusan Barwaaqo ka run sheegin aragtida B.Sare. Carraale iyo sida ay maansooyinka u kala nidaamayso. Sidaas daraadeedna uu Barwaaqo geed ugu xiranyahay aragtida Abwaan Gaarriye, taas oo badday inuu kala saaro maansooyinka dhaanto, heello, wiglo iyo hirwo.

Haddaba, waxa inoo ahaatay in aan si feejigan u garranno aragtiyada maansada miisaama; aragtiyadan oo aan mid si dheer u soo bandhigay, tan kalena uu Barwaaqo si dheer u soo bandhigay. Marka haddaba la isku rafaco labadan aragtiyood, waxa cad in ay kala giijisanyihiin. Waxaana cad in aragtida sharraxaysa miisaanka maansada ee adeegsanaysa muhiimmada alanka iyo shaqalkaba ay tahay aragti uusan qodobna jebin kerin, waana aragtida B.Sare. Carraale.

Waxa aan ku soo gabagabaynayaa, in aan qoraalkan geddigiis ku muujiyey in uusan Barwaaqo ka run dheegin jumladaisan:

... qoraalkan kooban oo aan kaga warcelinayey qoraalkii ahaa: *Kala saaruhu muuisa saaro*, waxan ku caddeeyey aqoon yarida qoraha (Idiris M. Ali) ee dhanka af Soomaaliga, aniga oo ku dadaalay inaan intii karaankay ah toosiyo si uu qoraalkana wax uga taransado. Waxa kale oo aan tilmaamay sida aanu qoruhu u burin afartii qodob ee ay aragtida Carraale fulinweyday. Waxa kale oo xusid mudan sida aanu waxba u soo kordhin oo sidii murtidii Soomaalidu tidhi aanu u hadal, hadal baa hadhay baa loo hadlaa ee uu arrinkiisu ahaa anaa hadhay oo hebel baan la dooday.

Haddii uu Barwaaqo “filayey inuu qoraalkaasi [qoraalkiisa hore] hormood u noqodo baadhitaan iyo barasho hor leh oo loogu noqdo labada aragtiyood ee Miisaanka Maansada oo haddii la hormarin karo la sii horma[r]iyo,” waa in uu aqbalaa jawaabta qoraalkaygan ku ladhan ee uu iga helay!

W.Q. Idiris M. Cali
Email: idkaduula@gmail.com

Dhugasho:

-
- ⁱ Daalaco: Siciid Saalax Axmed. “Hilinka Suugaanta & Hal Abuurka Minnesota 7.” Youtube. July 24, 2009.
<<http://www.youtube.com/watch?v=-UvtdVpMsiE>> [abbaaro, 2:39 – 2:43]
- ⁱⁱ Eeg C/raxmaan F. Barwaaqo: “Hadal baa hadhaa loo hadlaa.” Bogga 2aad.
<<http://www.scribd.com/doc/32471472/Hadal-Baa-Hadhaa-Loo-Hadlaa>>
- ⁱⁱⁱ Eeg Idiris M. Cali: “Kala Saaruhu, Muu isa Saaro?” Bogga 6aad.
<http://wardheernews.com/Articles_10/May/29_Dood_idiris.pdf>
- ^{iv} Eeg C. D. Guuleed (Carraale): *Gorfaynta Gabayga*. Bogga 23aad.
<http://wardheernews.com/Books/Carraale/Gorfaynta_Gabayga.pdf>
- ^v Eeg C. D. Guuleed (Carraale): *Gorfaynta Gabayga*. Bogga 17aad.
<http://wardheernews.com/Books/Carraale/Gorfaynta_Gabayga.pdf>
- ^{vi} Eeg Idiris M. Cali: “Kala Saaruhu, Muu isa Saaro?” Bogga 16aad.
<http://wardheernews.com/Articles_10/May/29_Dood_idiris.pdf>
- ^{vii} Eeg Idiris M. Cali: “Kala Saaruhu, Muu isa Saaro?” Bogga 11aad.
<http://wardheernews.com/Articles_10/May/29_Dood_idiris.pdf>
- ^{viii} Eeg C/raxmaan F. Barwaaqo: “Hadal Baa Hadhaa Loo Hadlaa.” Bogga 4aad.
<http://wardheernews.com/Articles_2010/May/Barwaaqo/Aragtida_Gaarriye_&_ta_Carraale_ee_MM.pdf>
- ^{ix} Eeg Jidhidhico: “Gabayga.” Hoos u deg, illaa aad ka gaadho shaxanka ugu hooseeya.
<<http://jidhidhico.wordpress.com/suugaan/maansada/gabayga/>>
- ^x Eeg C., S. C/laahi: “Labada Tiraabood.”
<<http://tiraab.blogspot.com/2008/12/labada-tiraabood.html>>
- ^{xi} Eeg Jidhidhico: “Maansada.”
<<http://jidhidhico.wordpress.com/suugaan/maansada/>>
- ^{xii} Dhagayso waraysiga BBCdu la yeelatahay Maxamuud Diiriye F. “Baal-Baal” ee ku duuban cajalka ku magaacaaban “Aanno-Dheer” ee ku naban rugaha-saabka ee Golkhatumo.com.